## La-talinta qoyska

Mararka qaarkood waxaa ka dhex dhasha caqabado dadka xiriirka. La-talinta qoyska ee degmadu waxay bixisaa taageero dhanka wadahadalka ah oo loogu talagalay lammaanaha iyo qoysaska raba inay xalliyaan **dhibaatooyinka** iyo **khilaafyada** ka dhex jira xiriirkooda. Tani waxay khuseyn kartaa caqabadaha ka jira xiriirka hadda jira ama dadkii hore xiriirka u lahaa, dhibaatooyinka xiriirka xubnaha kale ee qoyska, ama isku-dhacyada ka dhasha marka la kala tagayo.

Annaga oo ah dadka ka shaqaynayna la-talinta qoyska waxaanu leenahay **aqoon** gaar ah oo ku saabsan arrimaha wada-noolanshaha. Ujeeddada wadahadalladu waa in la horumariyo wada-xiriirka, in la xoojiyo xiriirka qoyska iyo in lagu caawiyo helitaanka xal shaqaynaya.

In kasta oo la-talinta qoysku inta badan loogu talagalay dadka waaweyn, haddana inta badan waxay saameysaa carruurta. Carruurtu waxaa saameyn ku yeesha **xiriirka dadka waaweyn**, sidaas darteed, xaaladda, xuquuqda iyo baahiyaha ilmaha ayaa qayb muhiim ah ka ah wadahadalka lala yeelanayo waalidiinta.

La-talinta qoysku waxay u furan tahay dadka dhammaantii, iyada oo aan loo eegin jinsiga, da'da, nooc galmada qofku yahay (sexuell läggning), aqoonsiga jinsiga, qowmiyadda, naafanimada (baahiyaha gaar ah), diinta ama kala duwanaanshaha awoodaha, diinta ama caqiidada kale. Wadahadalladu waxaa loo ilaalinaya si qarsoodi ahr, taas oo macnaheedu tahay in waxa lagu wadahadllo aan loo gudbin karin meel kale haddii aanay jirin sabab sharci ah. Waxaad leedahay xuquuq aad ku noqon karto qof aan magaciisa la aqoon.

Degmada waxaa ku waajib ah inay bixiso la-talin qoys oo tayo leh, oo ay joogaan shaqaale leh aqoon iyo khibrad ku habboon. Qofka raadinaya taageero wuxuu xaq u leeyahay qaabilaad xirfad leh oo ixtiraam mudan.

Si aad u qabsato waqti ama ballan, waxaad la xiriirtaa la-talinta qoyska ee degmada.

**Xiriirka**
Telefoonka: 12 34 56
Hemsida: www.kommun.se
Kharashka: 123 kr wadahadal kasta